

Haddi ay dhacdo dhibaato ama dagaal

Waxa aad u baahan tahay inaad ogaato

- haddii internet-ka, korontada iyo telefoonku aay shaqayn weeyaan
- haddii aad u baahatid inaad gabbaad raadsato
- ku saabsan isu-diyaargarowga iskaaga (egenberedskap)

Akhri, diyaar garow, oo wada hadla.

Macluumaad ka socda Degmada Oslo. Hayso buug-yarahaan.

Isu-diyaargarowga Guriga iyo Iskaashiga Bulshada

Dadka badankoodu waa inay awoodaan inay is-maareeyaan marka ay dhacdo xaalad degdeg ah ama qalalaase, sidaas darteed waa inaad diyaar garowdaa.

Qaado Mas'uuliyadda

Diyaargarowgu wuxuu ka bilaabmaa guriga. Kala hadal deriska, saaxiibbada ama qoyska sida aad isu caawin kartaan haddii wax dhacaan. Raadi qof aad noqotaan saaxiibbo diyaargarow.

Saaxiibbada Diyaargarowgu Waxay Isku Caawiyaan:

- wadaagga qalabka iyo sahayda
- hoy iyo meel lagu seexdo
- hawlo iyo shaqooyin wax-ku-ool ah
- daryeel iyo taageero

Ka Bilow Waxyaabaha Ugu Muhiimsan:

- Biyo la cabbo: ugu yaraan 20 litir qofkiiba
- Diirimaad: samee qorshe aad iskaga ilaalinayso qabowga
- cunto, nadaafad, dawooyin, qalabka gargaarka degdegga ah, toosh, raadiyaha DAB iyo lacag caddaan ah

Xasuusnow in waxyaabo badan oo aad u baahan tahay aad hore ugu haysato gurigaaga.

Noqo Mid Feejigan

Raac oo ku kalsoonow oo keliya macluumaadka ay xaqiijiyeen hay'adaha dowladda.

Haddii Shil Nukliyeer Dhaco

Kiniinnada iodhine waa in ay qaataan dadka ka yar 40 jir iyo haweenka uurka leh marka ay sidaas ku taliyaan hay'adaha dowladda. Dugsiyada, xannaanooyinka carruurta iyo hay'adaha kale waxay hayaan kiniinnada iodhine si degdeg loogu qaybiyo haddii loo baahdo.

Macluumaad dheeraad ah ka eeg:

- oslo.kommune.no/beredskap
- sikkerhverdag.no

Haddii Internet-ka, Korontada iyo Telefoonku Joojiyaan inay shaqeeyaan

Waxay noqon doontaa mid aad u adag in lala xiriiro dab-damiska, ambalaaska iyo booliiska. Goobaha macluumaadka waxaad ka codsan kartaa gargaar. Halkaas tag oo keliya haddii ay daruuri tahay.

Degmada Oslo waa inay mudnaanta siisaa dadka ugu baahida badan caawinta. Dadka badankoodu waa inay awoodaan inay is-maareeyaan. Haddii aad si degdeg ah ugu baahan tahay daryeel caafimaad, tag xarunta caafimaadka degdegga ah.

Qor oo xafid meesha ay ku taallo goobta macluumaadka ee kuugu dhow.

Goobaha Macluumaadka:

1. **Oslo Katedralskole**, Ullevålsveien 31
2. **Fagerborg skole**, Pilestredet 109
3. **Oslo Handelsgym**, Parkveien 65
4. **Ullern videregående**, Ullernchausseen 66
5. **Nydalen videregående skole**, Nydalsveien 30C
6. **Bentsebrua skole**, Treschows gate 16
7. **Foss videregående skole**, Steenstrups gate 20
8. **Bjerke videregående skole**, Statsråd Mathiesens vei 25
9. **F21 videregående skole**, Fyrstikkalléen 21
10. **Hellerud videregående skole**, Wilhelm Stenersens vei 6
11. **Ulsrud videregående skole**, Tor Jonssons veg 5
12. **Persbråten videregående skole**, Gamle Hovsetervei 1
13. **Apalløkka skole**, Tjernveien 12
14. **Stovner videregående skole**, Karl Fossums vei 25
15. **Lambertseter videregående skole**, Cecilie Thoresens vei 6
16. **Holmlia skole**, Nordåsveien 3

Haddii Seeriga Digniinta Duqeyntu Dhaco, Maxaan Sameeyaa?

Marka uu jiro weerar cirka ah, seeriga digniinta ayaa kuu sheegaya inaad degdeg u raadsato meel ammaan ah. Dooro meesha ugu dhow halka aad joogto.

Haddii Aad Gudaha Joogto

- Ku gabbaado meesha aad joogto, tusaale ahaan qaybta hoose ee dhismaha, jaranjarada gudaha ama qol aan lahayn daaqado
- Ha u bixin dibadda si aad u raadiso qol gabbaad

Haddii Aad Dibadda Joogto

- Raadi meesha ugu dhow ee ammaan ah, tusaale ahaan:

god ama jeex waddo dhinaceeda ah

buundo hoosteeda ama derbi adag gadaashiisa

qaybta hoose ee dhisme, meel baabuurta la dhigto ama saldhigga tareenka dhulka hoostiisa mara

ama

qolalka gabbaadka

Sawirro iyo naqshado: Degmada Oslo. Oktoobar 2026